

**Warsaxaafadeedka Beesha Tanade Daarood ee Tabashada Awood qaybsiga
Puntland**

14/08/2017

Waxaa soo gabagabooday gogoshii beesha Tanade ay dhigtay Magaalda Garowe 1/06/2017 ilaa 12/8/2017 taasoo ahayd mid looga hadlayo tabashada beesha Tanade ee Mataalaada Awood qaybsiga golayaasha Maamulka Puntland gaar ahaan Golaha Wakiilada.

Shirar badan oo ay la yeelatay beeshu Madaxda Maamulka, Isimada, Waxgaradka iyo siyaasiyiinta beelaha ku bahoobay Puntland waxaa beeshu xaqiisateey.

- In dulmiga awood qaybsi ee Puntland uu yahay mid qoto dheer kuna salaysan hab qabiilaya
- in xafintii tabashada beesha tanade iyo go'aankii isamada Puntland ay hortaagan yihiin dhamman siyaasiyiinta beesha Majeerteen.
- In dastuurka Puntland iyo dhammaan nidaamkii dowliga ahaa uu u afduuban yahay siyaasiyiinta beesha Majeerteen
- Markay u caddaatay inuu ka socon la yahay nidaamkii hal qof iyo hal cod beesha Majeerteen ujeedkeeduna yahay inay ku taraysato kursiga madaxweynaha iyo ku tagrifalka awoodaha dalka.
- Markay u caddaatay in Dastuurka Puntland hal beel ay ku ilaashato danabeeda lana dhumiyaq danihii dalka iyo beelaha kale lana furo marka beesha Majeerteen danteedu gasho oo keliya.

Sidaa daraadeed waxay Beesha Go'aansatay

1. In Beesha Tanade Daarood ka tashato musjiirkeeda mustaqbal
2. In Beesha Tanade shirweyne isugu timaado Magaalada Gaalkacayo 30 beri gudohood laga bilaabo Taariikhda go'aankaan.
3. Sidoo kale Beesha waxay u garaabaysaa dhammaan beelaha ku dulman Puntland iyo kuwa aan ku lahayn mataalada Golaha wakiilada loona awood sheegtay

Mahadcelin

1. Mahad Dhammaanteed waxaa leh Allihii lahaa Koonkan,
2. Beesha Tanade Daarood waxay u mahadcelinaysaa dhammaan Isimadii sharafta lahaa soona ajiibay wakhtiga dheerna geliyay gogashii Tanade kana soo saaray guddoonka tabashada Beesha Tanade, Go'aamiyayna in loogu daro Barlamaanka 4 xubnood Dastuurkana loofuro
3. Sidoo kale waxaan u mahadcelinaynaa Isimadii wakhtigu u saamixi waayay ee ka gasoo qayb galay qoraalkii Garowsaha lahaa (sida Boqor Burhaan, Islaan Bashiir iyo Isimadii Beesha Dhulbahante ee Muqdisho joogay) iyo kuwii wakaaladda soo samaystay
4. waxaan u mahadcelinaynaa Siyaasiyiinta labada gole ee Puntland (Xildhibaanada iyo Wasiirada) ee Beelaha Warsangeli, Dhulbahante iyo Dishiishe ee balan qaaday inay ansixiyaan guddoonkii Isimada kana garaabay dulmiga ay tirsatay Beesha Tanade ee awood qaybsiga Puntland.

ALLAA MAHAD LEH

1. Suldaan Maxamed Jaamac Shire
2. Suldaan Subayr X Maxamuud Cali
3. Garaad Cali Diini
4. Ugaas Maxamuud Shoole

